# Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center)
# Tilmaan Degdeg ah oo la siiyo Brograamyada Hagaajinta Guriga

Waaxda Horumarinta Xaafadda, iyadoo u mareysa Xarunta Guriga Boston (Boston Home Center), waxay milkiileyasha guriga xaqa u yeesha dakhliga siisaa deyn iyo kaalmada farsamada ay ku hagaajiyaan guryahooda. Waxa jira brograamyo tixgeliya dadka jira 62+ wayeelka, iyo kaalmada fiiqidda macdanta "lead" lana siiyo reeraha haysta caruurta ka yar lex sanno. Qaar ka mid ah deymaha waa la caffin karaa. Brograamyada HELP waxay u baahan yahiin 1/3 deynta loo isticmaalo hagaajinta dibadda. Dhamaan brograamyada waxay bixiyaan qiimeynta quwadda waxayna u maraan Renew Boston.

**Brograamka Deynta qiimaha ku soo kordhay Guriga (HomeWorks HELP)** wuxuu milkiileyaasha guriga siiyaa 0%

qadarka korsaarka, deynta hagaajinta guriga ee gadaal loo dhigay **ilaa $30,000 guriga qoyska 1- ilaa 4** iyo **ilaa $30,000 saddax geeslaha.** Milkiileyaasha guriga ee shaqeysta inta u dhexeyso 120-135% AMI waxaa laga rabaa in ay keenaan $1:$1

waafajinta maaliyadda. Kondominiumyada ku dhex jira 1-6 qeybta ururada kondominiumka waxay heli karaa ilaa $10,000.

**Brograamyada Hagaajinta Guriga Tixgeliya Da'da**

Hagaajinta Guriga Waayeelka kuwa jira 62+ sanno oo ah milkiileyaasha daggan guryaha 1-4 qoys ee shaqeysta in ka yar 80% HUD AMI, waxay helaan korsaar 0%, bixinta deynta hagaajinta guriga oo gadaal loo dhigo laga bilaabo hagaajinta yaryar ilaa baddalaadda siistemyada kululeynta. Xisaabaadka deynta waxay ku saleysan yahiin baahida loo qabo caafimaadka iyo hagaajinta ammaanka.

Waayeelka Dhaqaaleysta ee jira 60+ milkiileyaasha guryaha 1-4 qoys ee shaqeysta in ka yar 80% HUD, AMI, waxay helaan deeq la'eg $8,000 oo lagu kaalmeeyo milkiileyaasha guryaha xaqa u yeesha ay ku baddalaan siistemyadooda kululeynta ee duugga ah; waxay kaloo helaan korsaar 0% deynta gadaal loo dhigo oo la xariirta baaqiga baddalaadda.

**Ammaanka Macdanta "Lead" ee Boston (Lead Safe Boston)** (Caruurta ka yar lex sanno waxaa la siiyaa deyn la caffin karo **ilaa $10,000** halkii guri si looga hortago rinjiga macdanta "lead", iyo kaalmada farsamada si loo hubiyo in loo haggaansamo Sharciga Macdanta "Lead" (Lead Law) ee Massachusetts. Milkiilaha-dagganeyaasha guryaha 1-4 ama kondos waa in ay la kulmaan heerka xaq u yeelashada 80% AMI; milkiileyaasha maalgelinta dhismooyinka 1-4 qeyb waa in ay caddeyaan in ugu yaraan 50% dadka daggan dhismooyinka yahiin dad dakhligooda yar yahay/ dhexdhexaad yahay, qeybaha harayna ay daggan yahiin qoysas dakhligooda ku sugan yahay 80% ama ka yar Dakhli Dhexdhexaad CDBG.

## Si aad u heshid macluumaad badan:
## HomeCenter.boston.gov ama 617.635.4663